HERITAGE
INSTITUTE

# DOORASHADA DADBAN EE GOLAHA DEEGAANKA DOWLAD-GOBOLEEDKA KOONFURGALBEED EE SOOMAALIYA: JIDKA DIMUQRAADIYEYNTA















March 2023

# Tusmada


| | | |
|---|---|---|
| 1 | Hordhac | 4 |
| 2 | Sooyaalka | 4 |
| 3 | Habraaca Daraasadda | 6 |
| 4 | Marxaladaha xasiloonida qunyar socodka ah ayaa sahlay doorashooyinka dadban | 7 |
| 5 | Dibuheshiisiin loo maro doorasho dadban | 9 |
| 6 | Hannaanka loo dhan yahay | 11 |
| 7 | Xeeldheerayaasha farsamada oo ka wanaagsanaaday haldoorka siyaasadda | 14 |
| 8 | Dhibaatooyinka ka dhasha doorashada | 18 |
| 9 | Gunaanad | 20 |
| 10 | Talabixinno | 21 |

## Ku saabsan Qoraaga

**Cabdirisaaq A. Muxumed** waxa uu cilmibaare sare oo daraaseeya arrimaha dowladda ka yahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage, waana arday PhD ka diyaariya Culuumta Siyaasadda oo dhigta Jaamacadda Witwatesrand (Wits). Daraasaddiisii u danbeysay waxa ay ku saabsanayd dimuqraadiyeynta hoos ka bilaabanta iyo isbarbardhigga faderaalka.

**Xuquuqda daabacaaddan © 2023 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.**

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda**.**

**© Heritage Institute 2023.**

# 1. Hordhac

Gobolka Koofurgalbeed waa gobolka saddexaad ee ugu da'da weyn maamul-goboleedyada dowladda federaalka Soomaaliya. Waxa uu ku dhalasho xigay dowlad goboleedyada Puntland iyo Jubbaland. Maamul-goboleedkani waxa uu ka kooban yahay saddex gobol oo kala ah Shabeellaha Hoose, Bay iyo Bakool iyo siddeed iyo toban degmo. Gobolkani waxa uu ka mid yahay gobollada ugu kala duwanaanshaha badan marka loo eego qabiilooyinka degan.[1] Inkasta oo aan la haynnin tirakoob sax ah, haddana gobolkan waxa loo tixgaliyaa in uu ka mid yahay gobollada ugu dadka badan Soomaaliya.[2] Todobadii sano ee u danbeeyay, waxa gobolka ka hanaqaaday kacdoonno dimuqraadiyadeed, maamul-daadajin iyo dhismaha golayaasha deegaanka, iyada oo loo marayo doorasho dadban. Haddaba cilmibaaristani waxa ay u kuurgalaysaa heerka ay gaarsiisantahay in ay Koofurgalbeed dhisto dowlado hoose oo dimuqraadi ah; iyada oo u maraysa doorashooyin dadban oo ay lafdhabar u yihiin odayaashu– waa hannaan loo fasiro in uu ka dumuqraadisan yahay hab-dhaqanka magacaabista tooska ah. Waxa ay baaraysaa geeddi-socodka xasiloonida iyo dibu-heshiisiinta; iyada oo laga duulayo doorasho dadban, hannaannada qadiimiga ah ee la xiriira siyaasadda loo dhan yahay iyo doorka ay khuburada farsamadu ku leedahay qabashada doorashada dadban ee heer degmo, sida oo kale waxay ay daraasaddu muujinaysaa caqabadaha ka dhasha doorashada, waxaana lagu soo gabagabaynayaa talooyin.

# 2. Sooyaalka

Qodobka 77-aad ee dastuurka dowlad-goboleedka Koofurgalbeed ayaa oranaya "waa in dowlad-goboleedka Koofurgalbeed lagu maamulaa mabaadii maamul-daadajineed oo gaarsiisan ilaa heer degmo".[3] Inkasta oo dowlad-goboleedka Koofurgalbeed si degdeg ah loo aasaasay sannadkii 2014-kii, haddana dibudhiska dowladaha hoose waxa ay bilaabantay sannadkii 2017. Waa uun hal sano ka hor xukuumaddii Shariif Xasan Shiikh Adaan, oo ahaa madaxweynihii ugu horreeyay Koofurgalbeed, kaas oo xilka laga qaaday sannadkii 2018. Waxa intaas dheer, si la mid ah koofurta iyo bartahama Soomaaliya, in dowlad-goboleedka Koofurgalbeed ay haraysay khatarta al Shabaab. Kooxaha mintidka ah ayaa maamula qaybo badan oo gobolka ka tirsan, sidaa darteed, dhismaha dowladaha hoose ee gobolka waxaa ku yimid gaabis, waxaana sagxadda tagay horumarka dhaqaalaha Koofurgalbeed.[4] Hadda oo cilmibaaristan la qorayo, afar degmo oo kala ah Sablaale iyo Kuntunwaarrey oo ka tirsan gobolka Shabeellada Hoose iyo Tiyeglow iyo Rabdhuure oo ka tirsan gobolka Bakool ayaa gacanta ugu jira maamulka al-Shabaab.[5]

1. HIPS interview, 2022.
2. HIPS interview, 2022.
3. Southwest constitution.
4. HIPS interview, 2022.
5. HIPS interview, 2022.

Bilowgiiba, waxa geeddi-socodka dimuqraadiyeynta curyaamiyey rabshado soo noqnoqda, kala qaybsanaan bulsho iyo muranno siyaasadeed oo joogto ah.[6] Si kastaba ha ahaatee, caqabadahan siyaasadeed marnaba may joojinnin dhismaha dowladaha hoose. Inkasta oo ay jiraan arrimo siyaasadeed iyo tartan awoodeed oo u dhaxeeya dabaqadda siyaasadda, haddana dowlad-goboleedka Koofurgalbeed kuma badna loollanka qabiillada iyo malleeshiyooyinka kooxaha u abaabulani, marka la barbardhigo dowlad-goboleedyada kale ee federaalka. Sidaa darteed, 18-kiisa degmo waxa ay waafaqsan yihiin xuduudihii ka horreeyay 1991, mana jiraan degmooyin mar danbe la magacaabay.[7] Arrintan ayaa Koofurgalbeed ka badbaadisay dhibaatooyinka la xiriira sii kala qaybsan dheeraad ah iyo khilaafyo ku salaysan xuduudaha degmooyinka, taasina waxa ay u gogolxaartay in dhismaha dowladaha hoose loo maro hannaanka doorashooyinka dadban.

### Shaxdan hoose waxay muujinayaa tirada degmooyinka uu gobol kastaa leeyahay

| Shabeellaha Hoose | Bay | Bakool |
|---|---|---|
| Afgooye | Buurxakabo | Xudur |
| Wallaweyn | Baydhabo | Waajid |
| Sablaale | Berdaale | Ceelbarde |
| Awdhegle | Qansaxdheere | Rabdhuure |
| Kuntuwaarey | Diinsoor | Tiyeglow |
| Marka | | |
| Qoryooley | | |
| Baraawe | | |

Dowlad-goboleedka Koofurgaalbeed ayaa Xeerka Dowladaha Hoose ansaxiyey 2017, kaas oo dowladaha hoose loogu aqoonsanayo haayadda saddexaad ee maamulka, marka loo eego qaab-dhismeedka federaalka.[8] Hab-dhaqan ahaan, awoodda waxa lagu soo ururiyay Baydhabo, oo ah magaalada ugu weyn iyo caasimadda gobolka, taas oo si weyn loogu soo koobay hawlaha dowladda sida adeegyada horumarka iyo amniga. Sidaa darteed, wixii ka danbeeyay burburkii dowladdii militeriga ahayd ee duntay 1991, shan degmo oo kaliya (Xudur, Waajid, Baraawe, Diinsoor iyo Bardaale) ayaa markii ugu horraysay si dadban lagu soo doortay dowladaha hoose.[9]

6. HIPS interview, 2022.
7. Local Government Law of Southwest state, 2017.
8. Local Government Law of Southwest state, 2017.
9. HIPS interview, 2022.

Doorashooyinkii dadbanaa ee shantan degmo ka dhici jiray ayaa ku imaan jiray xil-magacaabis kor ka timaadda iyo saraakiil siyaasad loo magacaabay, taas oo uu mid ka mid ah madaxda dowladda hoose ku sifeeyay "heshiis-yare bulsho"[10] kaas oo ay odayaasha iyo qaybaha kala duwan ee bulshadu talo ku leeyihiin cidda noqonaysa duqa degmada iyo xubnaha golaha deegaanka.

Caadi ahaan, doorashada dadbani waa marxalad kumeelgaar ah, taas oo u dhaxaysa xil-magacaabista kor ka timaadda iyo doorashada qof iyo codka ah. Qodobka 9-aad ee Xeerka Dowladaha Hoose ee Koofurgalbeed ayaa kala xuduudayntan dhigaya, isaga oo oranaya " ilaa iyo inta ay xaaladdu saamaxayso in doorasho qof iyo cad ah lagu soo doorto dowladaha hoose, waxa beelaha metalaya oday-dhaqameedka reeraha degmooyinka deggan."[11]

Marka lagu dabbakho arrinta Koofurgalbeed, dimuqraaddiyadda waxa qeexaya heerka ka qaybgalka muwaadiniinta iyo inta ay gaarsiisan tahay awoodda bulshadu u leedahay kaqaybgalka dhismaha dowladaha hoose. Nidaamkan siyaasadeed ayaa ku qotoma, "dimuqraadiyad aan toos ahayn", oo ku tiirsan madax-dhaqameedka, iyo wadaaddada oo iyaga doorkoodu kooban yahay.  Sida oo kale nidaamkan ayaa ah mid baaxad ahaan iyo wacyi ahaan ba ka dimuqraaddisan nidaamyadii markii hore lagu soo xuli jiray maayarrada iyo golayaasha deegaanka, oo ahaa hab madaxtaabasho ah. Si kale haddii loo dhigo, waa "dimuqraadiyad dani keentay ah oo ku dhisan duruufta bulshada. Laakiin marka loo eego xaaladda siyaasadeed iyo isku xidhnaan la'aanta magaalooyinka ka dhex jirta oo ay al-Shabab keentay, ayaa dabadheereeyay in la gaaro doorasho qof iyo cod ah, waana "halka uu nuxurku daaran yahay."[12]

# 3. Habraaca Daraasadda

Ururinta xogta cilmibaaristan waxa loo isticmaalay habka tayagalka (Qualitative method). Cilmibaarayaashu waxa ay waraysteen xeeldheerayaal farsamo (oo ka soo shaqeeyay doorashooyinkii dadbanaa ee dowladaha hoose), xirfadleyaal, jaangooyeyaal-siyaasadeed, lataliyeyaal ka tirsan wasaaradda arrimaha gudaha iyo dowladaha hoose ee gobolka, aqoonyahanno iyo xubno ka tirsan goleyaasha deegaanka Baydhabo iyo Muqdisho. Ka dibna xogta waa la qoray,la kala guray oo la falanqeeyay. Intaas waxa dheer, ururinta xogtan waxa lala kaashaday, oo looga talo iyo tusaale qaatay dastuurka Koofurgalbeed iyo xeerarka dowladaheeda hoose.

---

10. HIPS interview, 2022.
11. Local Government Law of Southwest state.
12. HIPS interview, 2022.

# 4. Marxaladaha xasiloonida qunyar socodka ah ayaa sahlay doorashooyinka dadban

Koofurgalbeed, xasiloonida iyo doorashooyinka dadban ayaa ah kuwo isku lammaan. Meelaha ay wax xasilooni ahi ka hanaqaadeen, waxaa laga dhisay golayaasha deegaanka. Sida uu sheegay mid ka mid ah xog-ogaalku, Koofurgalbeed, xasiloonida iyo doorashooyinka dadbani "salka ayay ka xiriirsan yihiin  oo sida loo kala saaraa aadbay u adag tahay".[13]

In kasta oo daraasaddan lagu guudyeeli karo dhammaan dowladaha xubnaha ka ah federaalka ee koofurta iyo bartamaha Soomaaliya, waxa lagu tilmaansanayaa in guulo kooban iyaguna ay ka gaari karaan heerka xasilinta iyo dhisidda dowladaha hoose ee soo socda, balse waxa ay u baahan yihiin waqti, tamar, dhaqaale iyo hoggaan. Sida laga soo xigtay sarkaal sare oo ka tirsan shaqaalaha rayidka ah ee wasaaradda arrimaha gudaha, "ma jirto qaab kale oo loo maro dhismaha golayaasha deegaanka, laakiin waa in marka hore si dhab ah loo maalgeliyaa xasilinta."[14] Sidaa darteed, Koofur Galbeed waxa si tartiib u hanaqaaday geeddi-socodka dhismaha dowladaha hoose, sababta oo ah heerka xasiloonidii loo baahnaa kadib sannado badan oo ay al-Shabaab maamulayeen degmooyinka badankooda. Saaritaanka al-Shabaab waxa inta badan dabasocda dadaallada xasilinta, taas oo keenta in dadku ku soo xirmaan gobolka.

Geeddi-socodku waxa gaabis ka dhigay laba sababood oo waa weyn: tan kowaad, dadka toban sano iyo ka badan ku hoos jiray al-Shabab waxa ay u baahan yihiin in la qabatansiiyo, lagana dhaadhiciyo muhiimadda ay leedahay dowladda hoose. Sida uu sarkaal sheegay, muddo dheer ayay dadka ku qaadanaysaa in ay rumeeyaan in uu dhismaha dowlaha hoose keenayo mashaariic horumarineed iyo ismaamul. Sidaa darteed, "rumayn la'aanta" dadweynaha, ayaa qayb ka ah masuuliyadda gaabiska geeddi-socodka. Mar labaadka, haddii siyaasaddu tahay "farshaxanka maaquullada," geeddi-socodka dhismaha dowladda hoose waxa ay ku xiran tahay, " farshaxanka ka dhaadhicinta," sida uu sheegay Mustafe Shiikh Cabdillaahi, oo ah agaasimaha guud ee wasaaradda arrimaha gudaha dowlad-goboleedka iyo dowladaha hoose.[15]

Mustafe waxa uu ku qeexay "sida qof samada ka soo dhacay oo lafahu jajabeen, jidhkuna wada damqanayo"[16] khilaafka dabadheeraaday awgii. Marka tan loo eego, isticmaalka awoodda ayaa ka baxsan geeddi-socodka. Waxa la qaadaa tallaabo ay qabiillada waaweyni heshiiska ku yihiin, haddii la waayana waa la joojiyaa.[17]

13. HIPS interview, 2022.
14. HIPS interview, 2022.
15. HIPS interview, 2022.
16. HIPS interview, 2022.
17. HIPS interview, 2022.

Marka laga yimaaddo in aanay muddo dheer jirin haayad dowladeed oo shaqaynaysaa, duurxulka ah "Qof jabay" ayay laba hab ugu sifowdaa Koofurgalbeed. Marka dhan laga eego, qaabdhismeedkeeda dowliga ah ayaa si tartiib ah u soo kabanaya, waxaanay ku sifoobaysaa habka uu wasiir hore oo federaal ahi ku tilmaamay "jabniin joogto ah."[18] Si loo kabo jabniinkan joogtada ah, wasaaradda arrimaha gudaha Koofurgalbeed waxa ay sameysay maamul samatobixin ah oo shaqaynaya muddo lix bilood ilaa hal sano ah gaaraysa. Maamulkaas ayaa isu rogay dowladaha hoose ee degmooyinka. Maayirrada hadda jira iyo maamulka kumeelgaarka ah ee gobolka waxa wada magacaabay wasaaradda arrimaha gudaha ee gobolka iyo dowladda hoose. Sida uu sheegay mid ka mid ah shaqaalaha dowladdu, ujeeddada laga leeyahay habkan ayaa ah, in dadka iyo deeegaankaba la diyaariyo ka hor inta aan la bilaabin waxa uu ku tilmaamay"geeddi-socodka dimuqraadiyadda dhabta ah, taas oo lagu gaarayo doorasho dadban."[19]

Marxaladahan (xasilinta, samatabixiyaha iyo maaamullada kuwa kumeelgaarka ah) waxa raaci kara dowladaha federaalka kale ee koofurta iyo bartamaha Soomaaliya, si ay u dhistaan dowlado hoose oo "xor ah". Dhanka kale, waxa ay Koofur Galbeed ku guuleysatay in ay shan degmo u dhisto dowlado hoose, iyada oo dhanka kalena la daalaa dhacaysa falal amni darro oo ay fulinayso al-Shabaab.

Dhammaan jididka isku xira dowlad-goboleedkan waxa xirtay al-Shabaab, sidaa darteed waxa xannibmay isu socodka dadka iyo ganacsiga. Arrinta dowlad-goboleedka Koofurgalbeed, laba arrimood oo isku lammaan ayaa muhiimad gaar ah u leh dhammaystirka geeddi-socodka xasiloonida oo u hanaqaaday si tartiibta ah. Tan kowaad, doorashada dadban ee dowladaha hoose waxa ay suuragalaysaa oo kaliya markii dhidibada loo taagay xasiloonida.

Marka labaad, dhismaha dowladda hoose waxa jidbixin muhiim u ah u yihiin in degmooyinku ku jiraan gacanta dowladda federaalka. Sida uu sheegay mid ka mid ah saraakiisha amniga, doorashada xubnaha golaha deegaanku "waxa ay dadka ku nool degmooyinka siinaysaa dareen lahaansho."[20] Isla sida oo kale, dareenka lahaanshahani waxa uu kalsoonida dowlad-goboleedka iyo dowladda federaalka u kordhiyaa laba sababood oo isku sidkan. Dadka deegaanka ayaa iska caabbiyay soo laabashada al-Shabaab, waxaana ay dowlad-goboleedka iyo dowladda federaalka dadweynaha ku wacyigalinayaan dagaalka la gula jiro al-Shabaab, iyaga oo fikir ahaan ka duulaya kasbashada quluubta iyo maanka shacabka.[21] Tani waxa ay ka dhigan tahay in dhismaha dowladda hoose tahay jid loo maro dimuqraadiyaynta kor ka timaadda iyo xasiloonida siyaasadeed ee tartiibta ah.

18. HIPS interview, 2022.
19. HIPS interview, 2022.
20. Grindle, M. (2007). Going Local: Decentralization, Democratization, and the Promise of Good Governance. Princeton University Press.
21. HIPS interview, 2022.

# 5. Dibuheshiisiin loo maro doorasho dadban

> *Kaabayaasha dib u heshiisiinta waxa ka mid ah, doodo furan, kulminta odayaasha iyo ka wada xaajoodka aanooyinkii hore iyo garawsashada cidda degmo kasta aqlabiyaddeeda leh*

Merilee Grindele ayaa ku doodaysa in nidaamka dowladda hoose yahay "hab casri ku ah maamulka dadweynaha."[22] Run ahaantii, doorashooyinka dadban ee golaha deegaanku waa hannaan abuuraya dib u heshiisiin bulsho. Si ka duwan sida doorashooyinka dadban ee dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada kale u dhaliyeen rabshado iyo isku dhacyo, aasaaska dowladda hoose waxa uu Koofurgalbeed ka abuuray "kaabeyaal dib u heshiisiineed."[23] Kaabayaasha dib u heshiisiinta waxa ka mid ah, doodo furan, kulminta odayaasha iyo ka wada xaajoodka aanooyinkii hore iyo garawsashada cidda degmo kasta aqlabiyaddeeda leh.

Masuul ka tirsan wasaaradda arrimaha gudaha iyo dowladaha hoose ayaa sheegay "in si guud loo kala aqoonsado degmo kasta reeraha dega iyo cidda ugu badan deegaanka ay meesha ka saarayso caqabado waa weyn oo hortaagan dhismaha dowladaha hoose."[24] Tan micnaheedu ma aha in reeraha waaweyni damaca awood-qaybsiga kaga sadbursanayaan reeraha kale.

Taas macnaheedu ma aha in "qabiilka ugu badani" uu helo waxa uu rabo marka la eego awood qaybsiga qabiillada. Laakin waa aragtida ku salaysan in aan gobol na la xaqirin kuraastiisa ama aanu isagu qaadan sadbursiiyo dheeraad ah– si loo abuuro habdhaqan guud oo dammaanad qaadaya kalsoonida dowladaha heer federaal iyo heer maamul-goboleed. Sidaa darteed, xeerka dowladda hoose qodobkiisa 9-aad ayaa sheegaya, "inta ay xaaladaha iyo caqabadaha jiraa suuragalinayaan qabashada doorasho qof iyo cod ah, wasaaraddu waxa ay abaabulaysaa shir degmo, kaas oo kulminaya oday-dhaqameedka metalaya beelaha degmada daga."[25]

Caadi ahaan, doorashooyinka dadban ee heer degmo waxa ay sees u yihiin isku xirka bulshada. Haddii si fiican loo maareeyayana, may abuureen xamaasad siyaasadeed iyo kala qaybsanaan bulsho, taas oo ah aragti uu doorashooyinka dadban ka qabay mid ka mid ah xog-ogaalkii lagu waraystay daraasaddan; waa se gartii oo waa natiijada ka dhalata doorasho kasta oo ka qabsoonta heer federaal iyo heer dowlad-goboleed.

Waxa xiis gaar ah leh, in ay dibuheshiisiinta kor u qaaddo hannaanka ay siyaasadda uga qaybgalaan bulshooyinku. Aanooyinkii hore waxa lagu bogsiin karaa wadatashiyo isdaba joog ah, laakiin cabashooyinku ma aha kuwo si buuxda loo xalliyey- sida uu qabo mid ka mid ah shaqaalaha rayidka ah oo la waraystay.

22. HIPS interview, 2022.
23. HIPS interview, 2022
24. HIPS interview, 2022.
25. HIPS interview, 2022.

Tani waxa ay ka dhigan tahay in aan bulshada lagu qasbin nidaamka doorashooyinka dadban. Bulshada heshiiskeeda ayaa mudnaanta kowaad la siiyaa, waxaana la isku raacay qaabka awood qaybsiga. Lataliye ayaa yiri, doorashada lama qaban karo illaa ay wada aqbalaan odayaasha qabiil kasta horumuudka u ahi kuraasta loo qoondeeyay beeshooda. Waa hannaan sal iyo baar xiriirsan, oo siyaalo kala duwan loogu aqoonsanayo rabitaanka dadka.

Tani waxa ay muujinaysaa in halbeegyada dimuqraadiyayntu ku dhex milmeen doorashada dadban ee heer degmo. Si ka duwan dhaqankii siyaasadeed ee uu madaxweynaha maamul-goboleedkaasi ku magacaabay guddoomiyeyaasha degmooyinka iyo maayarrada magaalooyinka, waxa ay doorashada dadbani u muuqataa mid waafaqsan dalabaadka odayaasha oo ay ka mid yihiin in jifo kastaa u madaxbannaanaato soo xulista cidda u matalaysa wada-hadallada iyo cidda ku hadlaysa magacooda. Si kale haddii loo dhigo, xaaladda Koofurgalbeed, waxa uu dhismaha dowladda hoose dammaanad qaadayaa ugu yaraan awood-daadejinta maamulka iyo dimuqraadiyadda. Waa xaaladdan oo kale, ta uu mid ka mid ah xog-bixiyeyaashii la waraystay ku qeexay in doorashooyinka dadbani ay muujinayaan " aasaaska dhaqan siyaasadeed oo dimuqraaddi ah, kaas oo looga golleeyahay ujeeddo mustaqbal,"[26] yoolkiisuna yahay in beeluhu helaan is-xukun heer degmo.

> *"Mid ka mid ah xog-ogaalkii lagu waraystay daraasaddan ayaa yidhi, "Waraabe-utaaggu waa qof lagu soo dhextuuray beesha, oo ay siyaasiyiin aan beesha ahayni dabada ka riixayso, waxaanu wiiqaa geeddi-socodka dibuheshiisiinta iyo xasiloonida*

Is-xukunkan heer degmo loogama jeedo in "la shiiqin doono qabiillada laga tirada badan yahay iyo jifooyinka yar yar."[27] Run ahaantii, odayaasha ka soo jeeda qabiillada farabadnaanta lagu tuhmayo ayaa ka tanaasula damacooda xorta ah, taas oo muujinaysa in ay ka dhibaato yar tahay haddii xoog la adeegsado, markaas oo kuraas xaqdarro ah loo qoondeeyo "Waraabe-u-taag"[28] kaas oo sheeganaya in uu metelo qabiil ama jifo aan degaan ku ahayn degmadaas. Waraabe-u-taagga waxa lagu qeexaa qof aanay reerkiisu degaan ku ahayn degmadaas ama aanay raacsanayn beelaha uu sheegay in uu ku metalayo jagada siyaasadeed. Tani waxa ay dhacdaa marka qof keli ahi taageero ka helo siyaasiyiin awood badan oo ka soo jeeda dowlad-goboleedyada ama dowladda federaalka Soomaaliya. Marka ay taasi dhacdo, beeluhu waxa ay tirsadaan caddaalad darro iyo musuqmaasuq, ka dibna waxa ay is hortaagaan dhismaha dowladaha hoose. Mid ka mid ah xog-ogaalkii lagu waraystay daraasaddan ayaa yidhi, "Waraabe-utaaggu waa qof lagu soo dhextuuray beesha, oo ay siyaasiyiin aan beesha ahayni dabada ka riixayso, waxaanu wiiqaa geeddi-socodka dibuheshiisiinta iyo xasiloonida.[29]

26. HIPS interview with district council member, 2022.
27. HIPS interview, 2022.
28. HIPS interview, 2022.
29. HIPS interview, 2022.

Mid ka mid ah dadka ku xeeldheer dhismaha dowladaha hoose ayaa sharraxay in xasilinta iyo dibuheshiisiintu u gogol-xaareen in beeluhu cabbiraan aragtidooda, oo ay sheegtaan waxa ay rabaan. Tusaale ahaan, beelaha dega Diinsoor oo aan kaqaybqaadan siyaasadda.

Khabiir ku xeel dheer dhismaha dowladaha hoose ayaa sharaxay in xasilinta iyo dib u heshiisiinta ay u gogol xaarayaan in bulshooyinku ay ku cabiraan aragtidooda iyo waxa ay rabaan. Tusaale ahaan, bulshada degan Diinsoor ayaan ka cagajiiday dhismaha golaha deegaanka, markii dagmada laga xoreeyey Shabaab. Si loo qaboojiyo xiisadaha, islamarkaana loo yareeyo cabsida, waxa ay wasaaradda arrimaha gudaha ee gobolku dejisay maamul-hoosaad kumeelgaar ah, kaas oo ka shaqaynaya arrimaha dib u heshiisiinta. Tani waxa ay suuragalisay in bulshooyinku qeexaan rabtaankooda ku aaddan doorashadooda, wakiilladooda, iyo afhayeennadooda. Sidaa awgeed, hoggaamiyeyaasha beeluhu waxa ay wasaaradda arrimaha gudaha iyo dowladaha hoose ka codsadeen in ay soo dedejitaan doorashada iyo dhismaha golaha deegaanka.

## 6. Hannaanka loo dhan yahay

Caddaymo badan oo daraasadeed ayaa muujinaya in dadka deegaanku iska caabiyaan waxyaalaha ay u gartaan ajandeyaal siyaasadeed oo dibadda laga soo waariday. Waxa ka mid ah faragelinta dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada iyo doodaha ku salaysan qoondada haweenka, oo ay dadka qaar u arkaan "mashruuc shisheeye."[30] iyo "dhaqan bi'is."[31]

> *Waxaa caddaatay in diinta iyo dhaqanku ka saamayn badanyihiin xeerarka iyo dastuurka marka la rabo in odayaasha lagu qanciyo qoondada haweenka iyo wax u quuridda dadka laga tirada badan yahay, marka la joogo degmooyinka ku yaalla meelaha fogfog*

Iyaga oo maanka ku haya is-diidooyinkan, waxa ay hawl-wadeennada farsamadu hindiseen hannaan cusub oo qiil diineed iyo mid dhaqameed u raadinaya qoondada haweenka iyo ka mid noqoshada dadka laga tirada badan yahay ee Islaamka ah. Waxaana ka mid ahaa in la abaabulo culimada, iyo madax dhaqameedka, isla markaana jimceyaasha laga khudbadeeyo masaajiddada waaweyn. Waxaa caddaatay in diinta iyo dhaqanku ka saamayn badanyihiin xeerarka iyo dastuurka marka la rabo in odayaasha lagu qanciyo qoondada haweenka iyo wax u quuridda dadka laga tirada badan yahay, marka la joogo degmooyinka ku yaalla meelaha fogfog.

Qodobka 9 (f) ee xeerka dowladaha hoose waxa uu dhigayaa in "wasaaraddu xaqiijiso in ergada dooranaysa xildhibaannada golaha deegaanka ay boqolkiiba labaatan (20%) noqdaan haween." Iyada oo ay taasi jirto, haddana wax haween ah laguma soo darin doorashadii golaha deegaanka degmada Xudur sannadkii 2017-kii.

30. HIPS interview, 2022.
31. HIPS interview, 2022.

> “kuwaas oo ku saabsan awoodsiinta haweenka, iyada oo loo eegayo diinta Islaamka, si meesha looga saaro fikradaha taban ee ku salaysan NGO-yada iyo deeq-bixiyayaasha “waa waxyaalo lidka ku ah qiyamka Islaamka, isla markaan dhuunta u dhaafi waayay bulshada ; ayaa shardi u ah taageerada horumarka

Wadajir, oo ah qaab-dhismeed heer qaran ah oo lagu dhisayo golaha deegaanka, ayaa si weyn ugu guuldarraystay fahanka colaadaha iyo dhaqdhaqaaqyada qabiilka, iskaba dhaaf, in wax laga qabto su'aasha ah in loo dhammaado dhismaha dowladda hoose. Xudur, hawl-wadeennadu waxa ay mudnaanta siiyeen awaamiirta dastuuriga ah, waxaanay iska indhatireen dareenka dhaqanka iyo diinta ku dhisan.

Taa dhiggeeda, xubnaha golaha deegaanka Diinsoor oo ah 21 xildhibaan; 10 ka mid ahi waa dumar, inkasta oo ay si weyn uga soo horjeeesteen odayaasha iyo wadaaddadu. Madaxa hawl-wadeennada farsamada iyo agaasimaha wasaaraddda arrimaha gudaha iyo dowladaha hoose Mustaf Sheekh Cabdillaahi iyo kooxdiisa oo arrintaas ka falcelinaya ayaa billaabay olole wacyigelineed oo salka ku haya in qiil diineed iyo mid dhaqanka loo helo sidii ay haweenku uga mid noqon lahaayeen dowladda. Cabdullaahi waxa uu galay kulammo dhowr ah, isla markaana waxa uu jeediyay khudbado jimce oo taxane ah, kuwaas oo ku saabsan awoodsiinta haweenka, iyada oo loo eegayo diinta Islaamka, si meesha looga saaro fikradaha taban ee ku salaysan NGO-yada iyo deeq-bixiyayaasha “waa waxyaalo lidka ku ah qiyamka Islaamka, isla markaan dhuunta u dhaafi waayay bulshada ; ayaa shardi u ah taageerada horumarka.”[32]

Agaasimuhu waxa uu caddaymo ka soo xigtay ilo Islaami ah oo muujinaya in Islaamka laftiisu kor u qaaday kaalinta haweenka. Habkani ma ahayn mid lagu guulaystay oo kaliya, sida oo kale waxa si fiican loo kasbaday in degmada Diinsoor dhowr beelood garwaaqsadaan in gabari ku matasho wakiilladooda golaha deegaanka.

Habkan bilowga ah ayaa labeeyay dibu-doorashadii golaha deegaanka degmada Xudur oo dhacday 2022, iyada oo shan dumar ah loo doortay golaha deegaanka, halka aanay hal gabar ahi ku jirin golihii kowaad ee 2017. Hawlwadeennadu waxa ay soo bandhigeen “in ay haweenku ka musuqmaasuq yar yihiin, kana hawlkarsan yihiin ragga.”[33] Sida laga soo xigtay mid ka mid ah xog-ogaalka muhiimka ah, hawlwadeennadu “waxa ay adeegyada bulshada sida dugsiyada, cisbitaallada iyo xitaa waddooyinka ku tilmaameen guryo ay haweenka oo kali ahi maamuli karaan, iyo in ay ka shaqeeyaan waayeelku”.[34]

Sida uu Cabdillaahi qabo “khibradda dhabta ahi waxa ay muujinaysaa in ku tiirsanaanta qodobbada dastuuriga ah, qaab-dhismeedka Wadajir iyo xeerka dowladda hoose, marmarka qaarkood lid ku yihiin natiijada la rabo.”[35] Awaamiirta iyo qodobada dastuuriga ahi ma soo jiidanayaan dadweynaha, sababta oo ah waaqica iyo dabeecadda bulshada lamay falgalin.

---

32. HIPS interview, 2022.
33. HIPS interview, 2022.
34. HIPS interview, 2022.
35. Hajji, N. (2014). Institutional formation in transitional settings. Comparative Politics.

Tani waxa ay waafaqsan tahay doodda Naadiya Xaaji oo ah "waa caadooyinka ama fahanka guud ee bulshadu wadaagto waxa suuragaliya soo saaritaanka xeerarka ku salaysan xuquuqaha iyo xaddidnaanta.[36] Si kale haddii loo dhigo, mar haddii aanay dastuurka iyo qaab-dhismeedka sharcigu la jaanqaadaynin caadooyinka bulshada; waxa ay halis u yihiin diidmada dadweynaha.

Tallaabo tan la mid ah ayaa la qaaday markii la qoondaynayay kuraasta beelaha. Sidaa uu ku sharraxay madaxa farsamadu, "hoggaamiye dhaqameedka iyo wadaaddadu ma fahmaan nuxurka dastuurka iyo qaab-dhismeedka Wadajir, xataa haddii ay fahmaan, ma qiimeeyaan. Laakiin waxa ay yaqaannaan, oo ay ixtiraamaan fiqiga Islaamka, waana sababta aannu u isticmaallay nidaam sharci oo maangal ah kolkii aannu qoondaynayay kuraasta beelaha.[37]

Hababkani waxa ay ka barbar shaqeeyaan xeerka dowladda hoose, kaas oo xilliga doorashada nidaamiya tiro ergo ah, degmooyinkana u kala saara (A) iyo (B). Haddii ay degmadu tahay magaalo madax ama caasimad waxa loo aqoonsaday (A), waxaanay leedahay 27 xubnood oo gole deegaan ah. Degmooyinka (B) ahi waxa ay leeyihiin 21 xubnood.[38]

Qodobka 9 (d) ee Xeerka Dowladda Hoose ayaa dhigaya in "aanay ergooyinka dooranaya golaha deegaan ee degmada (A) tiradoodu ka badannin 150, kuwa degmada (B) aanay ka badannin 100."

Iyada oo ergadaasi tahay cidda kaliya ee xaq u leh in ay codayso doorashada dadban, haddana maalinta doorashada waxa aqallada iska soo buuxiya dad uu xog-ogaal muhiim ahi ku tilmaamay "kormeerayaasha doorashada. Tusaale ahaan, in ka badan 500 oo qof ayaa soo xaadiray dubu-doorashadii degmada Xudur, taas oo lagu suntay mid dimuqraadi ah, marka loo eego halbeegyada doorashada dadban. Laakiin waa in farta lagu fiiqaa in awaamiirta dastuuriga ah, xeerarka dowladda hoose iyo qaab-dhismeedka Wadajir ay saamayn kooban ku leeyihiin hababka u dhammaanshaha, xallinta khilaafaadka iyo qoondada kuraasta. Habraacyada iyo aqoonta maxalliga ah ayaa ka dheef badan, ugu yaraan marka loo eego awood-qabsiga iyo u dhammaanshaha maamulka Koofurgalbeed ee heer degmo.

36. HIPS interview, 2022.
37. Local Government Law of Southwest state, 2017.
38. HIPS interview, 2022.

# 7. Xeeldheerayaasha farsamada oo ka wanaagsanaaday haldoorka siyaasadda

> *Dilaaliinta xukunka iyo wakiillada maamul-goboleedka iyo hormuudka siyaasadda qaranka ee heer degmo ayaa u muuqda kuwo curyaaminaya habsami-socodka hawlaha, oo abuuraya waxa uu xog-ogaal muhiim ahi ku qeexay, "abaalmarin siyaasadeed oo muddo kooban*

Mid ka mid ah natiijooyinka ugu muhiimsan daraasaddan ayaa muujinaysa in xallinta arrimaha lagu muransan yahay ee la xiriira dhismaha dowladaha hoose ay kooxda farsamadu kaga fiican yihiin kooxaha siyaasiyiinta ah. Dilaaliinta xukunka iyo wakiillada maamul-goboleedka iyo hormuudka siyaasadda qaranka ee heer degmo ayaa u muuqda kuwo curyaaminaya habsami-socodka hawlaha, oo abuuraya waxa uu xog-ogaal muhiim ahi ku qeexay, "abaalmarin siyaasadeed oo muddo kooban."[39]

Foolaadka siyaasiyiinta qaranka sida guddoomiyaha baarlamanka federaalka, xubnaha xildhibaannada federaalka ee ka soo jeeda Koofurgalbeed iyo madaxweynaha maamul-goboleedka ayaa ku loollamaya saamaynta siyaasadda heer degmo. Waa tan meesha ay ka wiiqantay kalsoonida dadweynuhu ay ku qabaan hannaankan, waxaana ka dhashay waxa ay farsamayaqaanku ugu yeedheen, "kala aamminbixis laga baaqsan karayey.[40]

Kalsoonidarradan ayaa salka ku haysa in la aamminsan yahay in foolaadka siyaasaddu dano shaqsi ah u gacan bidixeeyeen habsami-socodka hawlaha.

Kalsooni darradani waxa ay salka ku haysaa iyada oo la aammnisan yahay in haldoorka siyaasaddu hawlaha doorashada u maroorsadaan dano gaar ahaaneed. Si ka duwan siyaasiyiinta, ayay inta badan kooxda farsamadu u abuurtaa nimaad loo dhanyahay si ay siyaasad ahaan u martigaliso qabiillada wax tirsanaya ama kooxaha laga tirada badan yahay. Odayaasha iyo wadaaddada ayaa aad u danaynaya in ay dhagaystaan, oo ay tixgaliyaan talooyinka kooxda farsamada.

Inta badan, beeluhu way iska caabbiyaan musharixiinta ay sida cad u hor kacayaan siyaasiyiintu iyo kuwa ay soo magacaabaanba. Tusaale ahaan, Madaxweyne Cabdicasiis Xasan Maxamed (Lafta-gareen) iyo Aadan Maxamed Nuur (Aadan Madoobe) oo ahaa Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka, ayaa dabada ka riixayay in Maxamed Macallin mar kale loo doorto maayarka magaalada Xudur, waxaanay isku dayeen in la is hortaago musharraxnimada Cumar Cabdillaahi Maxamed, oo markaa ahaa duqa magaalada Xudur.[41] Maxamed Macallin ma ahayn oo kaliya musharrax aan la jeclayn, laakiin waxa uu duqa magaalada soo ahaa ku dhowaad labaatan sano. Dhanka kale, waxa uu Maxamed ahaa hoggaan da'yar oo sumcad leh, isla markaana waxa uu lahaa rajo hoggaamineed oo tayo leh.

39. HIPS interview, 2022.
40. HIPS interview, 2022.
41. HIPS interview, 2022.

Si kastaba ha ahaatee, bulshada deegaanka ayaa ku hanjabtay in ay hubka qaadan doonaan haddii musharraxa ay rabaan laga hor joogsado in uu tartamo, taas oo ka dhalatay awood-maroorsi siyaasadeed iyo wax-isdabamarin ka timi hoggaanka sare e siyaasadda. Kooxda farsamada ayaa hoggaanka siyaasadda ku qancisay in Maxamed loo oggolaado in uu u tartamo duqa magaalada. Maalintii doorashada, xubnaha golaha deegaanka ayaa si cad uga hor yimid awaamiirta gacan ku rimiska ah ee ay tuurta ku sitaan dadka u dhaqdhaqaaqa siyaasadda gobolka iyo dowladda dhexe, waxaanay Maxamed u doorteen duqa degmada Xudur. Sida uu sheegay xubin ka tirsan kooxda farsamada, waxa loo codeeyay si hufan oo aan ceeb lahayn. Sida uu sheegay mid ka mid ah lataliyeyaasha wasaaradda arrimaha gudaha ee gobolku, doorashadani waxa ay ahayd "dhoollatus dimuqraadiyeed oo saacad qaadatay."[42]

Isku day kasta oo kor ka yimaadda islamarkaana lagu doonayo in natiijada doorashada lagu musuqmaasuqo waxa ka dhalan lahaa qalalaase siyaasadeed, kaas oo aanay ka hortagi kareen siyaasiyiinta heer qaranka iyo kuwa heer dowlad-goboleed. Guusha Maxamed waxaa keenay kooxda farsamada, oo doorashada ka dhigay mid hufan oo caddaaladda ku dhisan, islamarkaa aasaas u noqotay guusha Maxamed, taas oo siyaasiyiinta sarsare ku qasabtay in ay aqbalaan natiijada doorashada. Duqa magaalada Xudur ee la doortay, oo ka faa'iidaysanaya jaaniskiisa ayaa bilaabay hannaan cusub oo ku salaysan daahfurnaan. Bishii ugu horreysay xafiiska, waxa uu Maxamed shaaciyay ilaha dakhliga degmada iyo hoos u dhac ballaaran oo ku yimid kharashaadka miisaaniyadda, waana markii ugu horreysay ee daahfurnaan heerkan gaadhsiisan laga sameeyo Soomaaliya.[43]

Caddeymo daraasadeed oo laga helay doorashadii golaha deegaanka Puntland ee tooska ahayd, oo ka dhacday Qardho, Eyl iyo Ufayn ayaa sida oo kale si weyn u caddeeyey in daahfurnaantu tahay mid ka mid ah tallaabooyinka ugu muhiimsan ee lagaga hortagi karo rabshadaha ka danbeeya doorashada. Aqoonyahanka Helen Thompson, ayaa qaba in "dimuqraadiyaddu ku xiran tahay in uu natiijada aqbalo ka guuldarraystay."[44] Marka dooddan loo eego, aqbalaaddu waxa ay si weyn ugu tiirsan tahay heerka ay gaarsiisan tahay hufnaanta geeddi-socodka doorashada iyo tirinta codadku. Halka daahfurnaantu dhibane u tahay wax isdabamarinta siyaasadda, natiijaduna waxa ay noqotaa mid xoog loogu tartamo.

42. Hudur's district council webpage.
43. Thompson, H. (2022). Disorder in Hard times. Oxford University Press.
44. HIPS interview, 2022.

Koonfurgalbeed, kooxda farsamada ayaa mar kale u xaqiijisay xisbiyada tartamaya in aanay "waxba kala socon doonin, doorashana dhici doonin, haddii aysan ogolaansho wadajir ah ka helin beelaha".[45] Haldoorka siyaasaddu waxa ay si toos ah diiradda u saarayaan abuurista danaysi shaqsi oo degdeg ah iyo siyaasad xulufo ku dhisan. Waa dhif iyo naadir in ay arrimaha degmada ku qiimeeyaan xasaradaha ka aloosan iyo loollanka awood-qaybsiga, waxaanay awooddooda siyaasadda ka dhigteen baarashuut lagu soo dallaco musharaxiinta aan la jeclayn, taasina waxa ay uga sii dartay cabashooyinka beelaha iyo kala qaybinta hannaanka awood qaybsiga bulshada, iyaga oo dhinac ka dhaafay hoggaamiye dhaqameedyada iyo culimada aw-diinta.[46]

Sida uu sheegay xubin ka tirsan golaha deegaanka degmada Bardaale, haldoorka siyaasadda heer federaal ayaa Muqdisho ka soo diray "duqa magaalada", taas oo khilaaf ka dhex abuurtay beelaha. Tusaale ahaan, markii ay dhammaadeen afartii sano ee hore, waxa ay siyaasiyiintu iska dhegatireen awaamiirtii iyo soo jeedintii kooxda farsamada, kuwaas oo ku saabsanaa dibu-doorashada golayaasha deegaanka Bardaale. Sidaas darteed, laba doorasho oo is barbar socda ayaa la qabtay, cabashooyinkii siyaasadduna way ka sii dareen. Ugu danbey, waxa halkaas ku nafbaxday matalaaddii loo dhammaa.

Baraawe, waagaas waxa ka dhacay, in siyaasiyiinta haldoorka u ah dowlad-gobolleeddani u isticmaaleen doorashada golaha deegaanka musharraxiin la sii xulay, iyaga oo ay duqa magaalada ka dhigeen mid ka mid ah xuludafa siyaasaddooda.[47] Intaa ka dib, xidhiidhka wada shaqayneed ee ka dhexeeya xubnaha golaha deegaanka degmada iyo maayarka waxa hareeyay qalalaase, ku dhowaaday in uu curyaamiyo hawlihii shaqo ee dowladda hoose. Mid ka mid ah kaqaybagalayaashii xog-ogaalka ahaa ayaa sheegay in "doorashooyinka dibedda lagu soo farsameeyo, kadibna kursiga la keeno dad aan beelahoodu aqoon, taasina ay golaha deegaanka ka dhigayso mid aan shaqaynayn, haddii aanay burburininba."[48]

Doorashada golaha deegaanka Ceelbarde, waxa ay si fiican u muujinaysaa hannaanada kala duwan ee ay kooxda farsamada iyo siyaasiyiintu gobolku u mareen xalinta caqabadaha doorashada. Bishii Luulyo 2019, waxa degmada gaaray wafdi siyaasiyiin ah, kuwaas oo ujeedkoodu ahaa in la sameeyo gole deegaan oo ku yimaadda doorasho dadban.

Siyaasiyiinta ayaa baalmaray hoggaamiye dhaqameedka ugu cadcad degmada, iyaga oo iska indhatiray caado-dhaqameedka beelaha iyo sharciga dowlad deegaanka Koofurgalbeed oo dhigaya in madax dhaqameedku lafdhabar u noqdaan doorashada dadban.

45. HIPS interview, 2022.
46. HIPS interview, 2022.
47. HIPS interview, 2022.
48. HIPS interview, 2022.

Hoggaamiye dhaqameedka oo arrintaas qaaddacay ayaa bulshada ku kiciyay nidaamka doorashada iyo dillaaliinta siyaasadda, kuwaas ee laga soo diray dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada. Halkaas, wax horumar ah lagama samaynin, siyaasiyiintina wey iska laabteen, ka dib markii ay kumannaan kun oo doollar ku qarashgareeyeen laaluush, isla markaana ay abuureen isbahaysi iyo abaalmarin siyaasadeed oo muddo gaaban. Bulshadu waxa ay noqotay mid u kala qaybsan si aan waligeed dhicin, iyada oo isu qaadday aanooyin iyo cabashooyin ku fiday xuduudka Soomaalida (Ogaadeeniya).[49]

Ceelbarde, oo laga gooyey Koofurgalbeed, ayay koox farsamadu dib ugu laabatay bishii November 2022, si ay ugu gogolxaadhaan dhismaha golaha deegaanka. Bulshadu way diidday in ay arrintaa wax ka qabtaan, sababta oo ah waxa raadeeyay waayo-aragnimadii ay ka dhaxleen doorashadii hore, waxaanay aamminsanaayeen in ay kooxda farsamadu fulinayaan awaamiirta siyaasiyiinta federaalka iyo kuwa maamul-goboleedyada. Si kastaba ha ahaatee, hawlwadeennadu waxa ay yareeyeen cabsidii beelaha, iyaga oo wadaaddada caanka ah ku casuumay kulammo dibuheshiisiin ah. Kooxda farsamadu waxa ay si waafi ah iskaga bariyeeleen tuhunnadii ay ka qabeen bulshadu, waxaanay u sheegeen in ay u yimaaddeen in ay dhegaystaan tabashadooda. Habraacyadan ayaa si dabeeci ah u qanciyey shacabka Ceelbarde, waxaanay u gogolxaadheen hamsami-socodka doorashada.

Guddoomiyaha kooxda farsamada, Cabdillaahi ayaa qudbado jimce ka jeediyay mustajaamaca degmada, isaga oo u ololaynaya doorka ay wadaaddadu ku leeyihiin in la dhiso "bulsho iyo dowlad wanaagsan,"[50] Khudbadaha jimcaha ayaa ka mid noqday jidadka ugu waxtarka badan ee loo maro xallinta khilaafaadka, maadaama diinta Islaamku tahay xalka kabadanbaysta ah ee loola noqdo arrimaha la isku hayo, isla markaana lagaga fogaado cabashooyinka bulshada. Waxa kale oo la caddeeyey in ay tahay fagaaraha ugu fiican wacyigelinta dadweynaha iyo u dhammaanta siyaasadda la xiriirta doorashada dadban. Mid ka mid ah xog-ogaalka ayaa sheegay in khubarada farsamadu "la hadlaan quluubta bulshada,"[51] oo ay mudnaanta kowaad siiyaan xaaladda maxaliga ah.

Odayaasha iyo wadaaddada ayaa lafdhabar u ah bulshada marka la barbardhigo haldoorka siyaasadda oo iyagu ah kuwo bulshada lagaga soo tuuro Baydhabo ama Muqdisho. Masaajiddada ayaa ah goobaha ugu cadcad jaangoynta siyaasadda degmooyinka, waxaanay u dhigmaan aqallada shirarka golaha deegaanka marka loo eego dimuqraadiyadda reer galbeedka.

---

49. HIPS interview, 2022.
50. HIPS interview, 2022.
51. HIPS interview, 2022.

Wali waxa ay dhibi ka taagan tahay in si macquul ah la isugu dheellitiro gacansarraynta ay raadinayaan siyaasiyiinta dowladda federaalka iyo kuwa maamul-goboleeddada iyo ilaalinta doorashooyinka dadban iyo habsami-socodka hawlaha dimuqraadiyeynta ee ku salaysan qorsheyaasha siyaasadda iyo wax-isdabamarinta. Jidka kaliya ee lagu gaari karo dheellitirnaanta ayaa ah in awood la siiyo khubarada farsamada, si loo dhowro xamaasadda bulshada, loona ilaaliyo hufnaanta iyo u dhammaanta bulshada, iyada oo la xallinayo arrimaha la isku hayo, lana dhammaynayo cabashooyinka u dhaxeeya beelaha.

## 8. Dhibaatooyinka ka dhasha doorashada

Inkasta oo ay jiraan caqabado waaweyn oo la xiriira waddo la'aanta iyo amni-darrada ay sababtay al-Shabaab, haddana dhibaatada ugu weyn ayaa ku salaysan sida looga hawlgalayo degmooyinka, marka ay doorashadu dhammaato. Xubin ka mid ah golaha deegaanka ayaa yiri, "doorashadu waa in ay noqotaa jid loo maro matalaadda dhabta ah, si wax looga qabto baahiyaha dadweynaha".[52] Inkasta oo ay doorashada dadbani abuurtay dareen ku dhisan matalaad siyaasadeed, haddana mid ka mid ah kaqaybgalayaasha daraasaddan ayaa sheegay in dowlad hoose oo bilaa miisaaniyad ahi ka dhigan tahay, "siyaasad aan baalal lahayn oo cagaagan".[53] Marka loo eego fekerka kaqaybgalahan, waa in uu maamulka dowladda hoose la yimaaddaa miisaaniyad qoondaysan. Xubin kale oo ka tirsan golaha deegaanka ayaa sheegtay in ay khalad siyaasadeed tahay rajada laga filayo in ay dowladda hoose "ka shaqeyso, kana jawaabto baahida dadweynaha, iyada oo aan la helin taageero dhaqaale ". [54] Ilaha dhaqaale oo ah kuwo aad u xaddidan ayaa caqabad weyn ku ah in la dhiso ama la joogteeyo dowlad hoose oo shaqaynaysa; tanina kuma koobna Koofurgalbeed oo kaliya ee Soomaaliya oo dhan ayay ka jirtaa.

*"Xubnaha golaha deegaanka ma helaan mushaar joogto ah ama gunno bille ah. Tani waxa ay xaddidaysaa awoodda go'aan-qaadashada dowladda hoose, oo ah haayad u taagan in ay nidaamka federaalka "ka kala fududayso awood isku koobidda xad-dhaafka ah*

Siyaasiyiinta heer federaal iyo kuwa heer maamul-goboleed oo ku tagrifalaya degmooyinka ayaa degdeg u maalgaliya musharraxiinta u tartamaya maayarrada degmooyinka, balse waxa ay u muuqdaan kuwo aan dan iyo muraad ka lahayn miisaaniyad loo qoondeeyo hawlaha dawladda hoose. Sida uu sheegay xubin ka tirsan golaha deegaanka Bardaale arrintani waxa ay meesha ka saaraysaa hadafkii laga lahaa dowlada hoose, marka loo eego isu soo dhawaynta shacabka iyo matalaada siyaasadda heer degmo. [55]

Xubnaha golaha deegaanka ma helaan mushaar joogto ah ama gunno bille ah. Tani waxa ay xaddidaysaa awoodda go'aan-qaadashada dowladda hoose, oo ah haayad u taagan in ay nidaamka federaalka "ka kala fududayso awood isku koobidda xad-dhaafka ah" [56]

52. HIPS interview, 2022.
53. HIPS interview, 2022.
54. HIPS interview, 2022.
55. Grindle, M. (2007). Going Local: Decentralization, Democratization, and the Promise of Good Governance. Princeton University Press.
56. HIPS interview, 2022.

Sida ay sheegtay Merilee Grindle. Mid ka mid ah xeeldheerayaasha farsamada ayaa sheegay, in danayn la'aanta qoondaynta miisaaniyadda dowladaha hoose ee heer federaal iyo heer goboleed ay leeyihiin laba saamaynood iyo wax ka badan. Ugu horrayn, shacabka ku dhaqan degmooyinka ayaa laga yaabaa in ay niyad jabaan, iyaga oo doorashada dadban u turjumanaya bandhig siyaasadeed oo aan wax badan kaga duwanayn xukuumadaha fadhiidka ah ee heer federaal iyo heer maamul-goboleed. Sida oo kale, bixinta adeegyada asaasiga ah oo gabi ahaanba ka maqan shaqada dowladda Soomaaliya ayaa caqabad weyn ku ah soo saarista dakhliga gudaha, iyada oo aanay dowladdu abuurin wax dadweynaha ku dhiirrigelinaya ka qaybgalka hawlaha doorashada.

Marka caqabadahaas laga yimaaddo, maayarrada iyo xubnaha golayaasha deegaanka ee ku yimaadda doorashada dadban, ayay dadku ka doorbidaan kuwa ku yimaadda magacaabista siyaasiyiinta. Degmooyinka ayaa inta badan aamminsan in dowladda hoose ay tahay buundo isku xirta bulshada iyo dowladnimada, islamarkaana u dhiganta haayadaha dowladda federaalka iyo kuwa dowlad goboleedyada.

> *"Waa in mudnaanta koowaad la siiyaa in xubnaha golaha deegaanka lagu tababaro maamulka miisaaniyadda, canshuuraha iyo guud ahaan waajibaadkooda shaqo ka hor inta aanay bilaabin hawlaha dawladaha hoose*

Mid ka mid ah waaayo-aragga golaha deegaanka ayaa soo jeediyay "in la khariidadeeyo ilaha waxsoo saarka dakhliga gudaha ee maaquulka ah" [57] ka hor inta aan la dhisin golaha deegaanka. Waxa uu soo jeediyay in ay koox xirfadlayaal ah, oo ka socda dowladda hoose ay daraasad ku sameeyaan ilaha dhaqaale ee ugu muhiimsan nolosha dadka degmada iyo in ay qiyaasaan dakhliga ay degmadu soo saari karto bishii. Tan ayaa hage u noqonaysa golaha deegaanka. Waa in mudnaanta koowaad la siiyaa in xubnaha golaha deegaanka lagu tababaro maamulka miisaaniyadda, canshuuraha iyo guud ahaan waajibaadkooda shaqo ka hor inta aanay bilaabin hawlaha dawladaha hoose.

Si kastaba ha ahaatee, dardargelinta dimuqraadiyeynta loo marayo doorashada dadban ee dowlad Koofurgalbeed ayaa u muuqata mid siyaasad ahaan shacabka soo jiidaneysa, marka la barbardhigo nidaamkii hore ee magacaabista kor ka timaadda. Lataliye sare oo ka tirsan wasaaradda arrimaha gudaha iyo dowladaha hoose ee gobolka ayaa yiri, waa in "la awdo goldaloolooyinkeeda, waana in ay hawlaha doorashadu socdaan".[58] Doorashada dadban ee degmooyinku waa "sida kaliya ee suuragalin karta in ay muwaadiniintu ka qaybgalaan siyaasadda".[59]

57. HIPS interview, 2022.
58. HIPS interview, 2022.
59. HIPS interview, 2022.

# 9. Gunaanad

Shan ka mid ah 18-ka degmo ee Koofurgalbeed ayaa illaa hadda si dadban loo doortay gole deegaan. Maayarradii siyaasad ahaan xagga sare looga soo magacaabi jiray waxa degmooyinka Xudur, Bardaale, Waajid, Baraawe iyo Diinsoor beddelay maayarro ku yimi doorasho dadban.

Dhisidda maamul kumeelgaar ah ayaa u gogolxaartay doorasho dadban oo dimuqraadi ah. Nidaamkan waxa siyaasaddiisa lafdhabar u ah odayada beelaha iyo heshiiska bulshada, waxaanu abuuray dareen dumuqraadiyadeed oo salka ka unkamay.

> *Si ka duwan doorashooyinka dadban ee heer federaal iyo heer dowlad-goboleed ayuu dhismaha goleyaasha deegaanka Koonfurgalbeed u abuuray qaab-dhismeedka dibuheshiisiinta*

Dibuheshiisiinta ayaa ku lammaan geeddi-socodka hawshan. Si ka duwan doorashooyinka dadban ee heer federaal iyo heer dowlad-goboleed ayuu dhismaha goleyaasha deegaanka Koonfurgalbeed u abuuray qaab-dhismeedka dibuheshiisiinta. Arrimahan, waxa ka mid ahaa doodo dadweyne oo ku saabsan awood-qaybsiga beelaha kala duwan ee degmooyinka wada dega iyo soo bandhigidda cabashooyinka ay qabaan shaqsiyaadka iyo kooxahu. Inta badan, waxa ay tani dhacdaa marka kooxda farsamada oo kaliya loo daayo hawlaha dhexdhaxaadinta.

Doorashada dadban ee Koofurgalbeed waxa ay ahayd mid aan nooceeda hore loo arkin, sababta oo ah waxa ay hawlwadeennadu ku saleeyeen siyaasadda loo dhan yahay.

Waxyaalaha ay dadka deegaanku diidan yihiin waxa ka mid ah qoondada haweenka oo ay u arkaan ajande shisheeye oo dibadda laga soo waariday. Si ay hawlwadeennadu wax uga qabtaan caqabadaha hortaagan in ay dadka laga tirada badan yahay iyo haweenku ka qaybgalaan siyaasadda golaha deegaanka, waxa ay u noqdeen arrimaha dhaqanka iyo awaamiirta diinta Islaamka. Marka loo eego doorashada loo dhan yahay, waxa awaamiirta dastuuriga ah iyo sharciyada dowladda hoose ka waxtar badan adeegsiga aqoon-dhaqameedka iyo fahanka xaaladda deegaanka.

Marka loo eego wax-ku-oolnimada, masaajiddada, khudbadaha jimcaha iyo fiqhiga Islaamka ayaa ah fagaareyaasha iyo madalaha ugu muhiimsan ee la ixtiraamo, kuwaas oo ku habboon in loo adeegsado wacyigalinta siyaasadda loo dhan yahay. Bulshooyinku way u jajaban yihiin aqbalaadda waxyaalaha dhaqanka iyo diinta waafaqsan. Si ay kor ugu qaadaan wacyiga bulshada, una xalliyaan arrimaha murugsan sida awood-qaybsiga iyo arrimaha dhaqanka ee xasaasiga ah, waxa ay kooxda farsamadu, siyaasad ahaan uga faa'iidaysteen dariiqooyinka maxalliga ah.

“
*Marka loo eego tirada haweenka ku jira golaha deegaanka, Diisoor ayaa degmooyinka Soomaaliya oo dhan ugu haween badan. Guulahan waxa la gaaray, ka dib markii loo eegay awoodda iyo karaamada ay diinta islaamku siiyay haweenka*

Tusaale ahaan, shuruucda Islaamka ayuu guddoomiyaha kooxda farsamadu u adeegsaday xallinta khilaafyada ku salaysan awood-qaybsiga ee u dhaxeeya beelaha Xudur. Marka loo eego tirada haweenka ku jira golaha deegaanka, Diisoor ayaa degmooyinka Soomaaliya oo dhan ugu haween badan. Guulahan waxa la gaaray, ka dib markii loo eegay awoodda iyo karaamada ay diinta islaamku siiyay haweenka.

Xeeldheerayaasha farsamada ayaa dhismaha golayaasha deegaanka kaga haboon ama kaga fiican siyaasiyiinta dhaqanka ka dhigtay wax-isdabamarinta iyo musuqmaasuqa. Siyaasiyiintu waxa ay ku shaqaystaan kicinta dadweynaha iyo ku kala qaybinta siyaasadda, halka ay kooxda farsamadu ka adeegsadaan habab ay bulshadu raalli ka tahay oo dabiici ah. Laakin maqnaanta dakhliga waxsoosaarka gudaha, maqnaanta qoondada miisaaniyadda, iyo bixin la'aanta adeegyada aasaasiga ah ayaa halis ku ah sii jiritaanka dowladda hoose, oo ah heerka saddexaad ee awoodda nidaamka federaalka. Si kastaba ha ahaatee, doorashada dadban iyo dhismaha golaha deegaanka Koonfurgalbeed, waxa loo arkaa  tallaabo hore loogu qaaday jidka dimuqraadiyadda, taas oo beddeshay xukunkii xil magacaabista xagga sare ka timaadda ku dhisnaa iyo in uu geeddi-socodka doorashadu sii hanaqaadi doono.

# 10. Talabixinno

1. Dhismaha golayaal deegaan oo ku yimaadda doorashooyin dadban, ayaa abuuraya fagaare ay muwaadiniintu kaga qaybgalaan dowladda. Koofurgalbeed, waa in ay sii dardargalisaa guulaha ay gaartay, iyada oo dhisaysa dowlado hoose oo ku yimaadda doorasho dadban iyo doorashooyin dimoqraadi ah oo ka dhacda degmooyinka ay si buuxda u maamusho oo dhan.

2. Kor u qaadista daahfurnaanta geeddi-socodka hawlaha doorashada dadbani; waa hannaan lagu gaaro dibu-heshiisiin bulsho iyo mid siyaasadeed. Siyaasiyiinta dowladda federaalka iyo kuwa dowlad goboleedyadu waa in ay ka waantoobaan in ay beelaha ku jujuubaan musharaxiin ay ku danaysanayaan.

3. Dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyadu waa in ay adeegsadaan dhaqan-siyaasadeed ku habboon hababka dabeeciga ah iyo siyaasadda loo dhan yahay. Wacyigalinta loo maro masaajiddada, shareecada Islaamka iyo khudbadaha jimcaha ayaa la ogaaday in ay muhiim u yihiin horumarinta habsami-socodka dimuqraadiyaynta iyo in haweenka iyo dadka laga tirada badan yahay kaqaybgalaan dowladda hoose.

4. Dowlad goboleedka Koofurgalbeed waa in uu heer madaxbannaani ah u siiyaa khubarada farsamada/hawlwadeennada qabashada doorashada. Caddaymo daraasadeed ayaa shaaca ka qaadaya in khubarada farsamadu ku habboon yihiin xallinta khilaafyada cakiran sida awood-qaybsiga iyo cabashooyinka la xiriira siyaasadda marka loo eego siyaasiyiinta.
5. Hawlwadeennadu waa in ay daraasadeeyaan hab-nololeedka iyo dhaqan-dhaqaalaha degmo kasta, ka hor inta aan la dhisin golaha deegaanka. Tani waxa ay degmada ka caawin doontaa in ay abuurto dakhli guud, oo ay ku maamusho hawlaheeda.
6. Dowladda federaalku waa in ay dawlad-goboleedyada ku cadaadisaa in ay miisaaniyad u qoondeeyaan dowladaha hoose, si kasta ha u yaraatee, waxay lacagtaasi wax ka tari kartaa hawlaha maamul ee golaha deegaanka.
7. Golayaasha deegaanka iyo maayarrada magaalooyinku waa in ay dadweynaha u soo bandhigaan kharashaadka miisaaniyadda. Arrinta Xudur ayaa tusaale u noqon karta.

HERITAGE INSTITUTE

The Heritage Institute for Policy Studies
http://www.heritageinstitute.org